

Jooji TB Jeermiga Kahor Intaadan la jiran!



Waa maxay TB-da? "TB-da" waa magac la soo gaabiyay ee loo yaqaan cudurka qaaxada ama tiibishada. TB-da waa ay saamayn kartaa waaxyaha jirka oo dhan, Laakiin waxay inta badan saameysaa sambabada.

Sideebaan u qaadi karaa jeermiga TB-da? Marka qofka uu cudura Qaaxada ku dhaco, ugana dhaco sambabada ama dhuunta oo uu qufaco, hadlo, qoslo ama hindhiso, jeermiga qaaxada ayuu hawada ku firdhiyaa. Qof walba oo u dhowna waxaa sambabada uga faafa jeermiga Qaaxada ama Tiibishada. TB-da kama qaadi kartid salaanta gacanta, wadaaga bakeeriga/koobabka iyo weelasha, amaba fadhiga musqusha (suuliga). Jeermiga qaaxada ama tiibishada jirkaada ayuu ku noolaan karaa adiga oo aan la jiranin. Taasna waxaa loo yaqaan **jeermiga Qaaxada** dhaliya Marmarka qaarkood, jirkaada ma awooda inuu la dagaalamo jeermiga TB-da. Hadii aad jeermigaas la jirato, jiradaas ayaa loo yaqaanaa cudura qaaxada ama tiibishada Haduu cudurka qaaxada ama tiibishada kugu dhaco, waxaad u baahantahay gargaar caafimaad. Daaweyn sax ah ayaa ku bogsiin karta. Waadna u dhiman kartaa hadaadan daaweyn helin.

Sideebaan ku ogaan karaa hadii aan qabo jeermiga TB-da? Waa mide, baaritaanka jirkaada ayaad ku ogaan kartaa hadii aad qabto jeermiga TB-da. Baaritaankaan gacantaa lagu sameeyaa. Daryeelaha caafimaadkaada ayaa kuu sharxi doono baaritaankaas. Haday soo buurato meesha gacanta tijaabada ama baaritaanka looga sameeyay, waxaa laga yaabaa in baaritaankaadu uu yahay hubaal "baasatibo". Hadii uu daryeelaha caafimaadka go'aamiyo inay natiijada baaritaanka hubaal tahay "baasatibo", waxaad qabtaa ama kugu dhacay jeermiga TB-da. Laga yaabe in natiijada baaritaankaada aan la hubin "negatibo". **LAAKIIN**, hadii aad ka ag dhawaatay qof cudurka qaaxada qaba, waxaa laga yaabaa inaad u baahato in dib lagu baaro.

Baaritaanka jirkeyga wuxuu noqday hubaal "baasatibo". Marka maxaan hada sameeyaa? Talaabada ugu horeysa waa inaad raajada xabadka iska qaadaa, si aad u habsato inaad qabin cudurka qaaxada. Hadaanan raajada laga arag cudurka qaaxada, laga yaabe inaad weli u baahato inaad qaadata daawo, si ay kaaga ilaaliso inaad jeermiga TB-da la jirato. Waxaa laga yaabaa in daryeelahaaga caafimaadka uu ku siiyo hal daawo amaba ka badan si uu kaaga daaweyo jeermiga. Aad bay muhiim u tahay inaad qaadata daawooyinkaada. **Mudo dheer ayay qaadataa in la dilo jeermiga TB-da.**

Maxaan u baahnahay inaan ka ogaado daawooyinkega? Laga yaabe inay qasab tahay inaad qaadata daawadaada 4 ilaa 9 bilood. Daryeelaha caafimaadkaada ayaa kuu sheegi doono sida loo qaato daawooyinkaada. Weydii daryeelaha caafimaadkaada dhibaatooyinka daawooyinkaada ay keeni karaan.

Sideen ku bartaa in ka badan?

- Waxa aad weydiisa dhakhtarkaaga ama kal-kaaliye. Weeydii takhtarkaaga ama kaaliyaha.
- Waxa aad wacda waaxda caafimaadka xaafadaada ama waaxda caafimaadka gobolka.

Ka ilaali naftaada, qoyskaada iyo saaxiibadaa Qaaxada – qaado daawooyinkaada TB-da oo dhan!

Text - Virginia Department of Health Division of TB Control www.vdh.virginia.gov/epi/tb
November 8, 2002 Software by Healthway Software ©2002
This work is licensed under the Creative Commons Attribution-NonCommercial-NoDerivs License
<http://creativecommons.org/licenses/by-nc-nd/2.5/>

A Healthy Roads Media project
www.healthyroadsmedia.org

Funded by the National Library of Medicine under contract N01-LM-1-3513
from the Greater Midwest Region of the National Network of Libraries of Medicine.